


Fayruska-Corona

Halkan ka aqriso:

- Nidaamka dowlada • Xanuunada corona leedahay
- Baarista • Tallaalka

Talloyinka gudaha iyo banaanka


- Waa inaad mar walba ka fogaataa 1,5 mitir dadka kale.
- Ilmaha ilaa 13 jir wey isu dhawaan karaan iyo dadka weyn weyn u dhawaan karaan.
- Gacmaha saabuun ku dhaq marka aad guriga imaado ama aad qof soo booqato.
- Ka shaqey guriga, ilaa haddii aysan si kale suuroobin.
- Marka aad gudaha joogtid, tusaale guriga ama xafiiska? Markaa dariishada fur hadey suuroobeyso. Markaasi si fudud dadka isuma qaadiin karaan.



Maskarka afka laga bilaabo 13 jir


Maskarka afka waa waajib in la xirtaa meelaha soo socda:

- Iskuulka. Maskarka waa iska bixin kartaa marka aad casharka ku jirto.
- Gaadiidka dadweynaha gudahiisa, istashoonka iyo diyaarada dhexdeeda.



Meelaha kale oo dhan maskarka afka qasab ma aha.

Haddana waa in meel walba 1,5 mitir inaad dadka ka fogaataa.



Markaad jiran tahay: waxaad sameysaa baaritaan iyo joog guriga

Waxaad sameysaa baaritaan-Corona iyo joog guriga haddii 1 ama ka badan calaamadahan qabto:

- ka badan 37,5 darajo
- neefsashada ku dhibeyso.
- mar keliya carfiska iyo dhadhamiska kaa tago.
- qufaca
- hindhiska
- diif sankaa ah
- dhuun xanuun

Markuu jiro **xumad** ama **neefsashada ku dhibeyso** waa in qof walba oo gurigaaga deggan, guriga **joogaan**. Haddii aadan xanuun lahayn ha **sameynin** baaritaanka. Xumad waa marka ay xaraarada ka badan tahay 38 darajo.

Baaritaanka

Baaritaanka- Corona waa lacag la'aan

Waxaad ballan u sameysan kartaa 2 qaab:

1. Combiyutarka: Aad www.coronatest.nl. waxaad u baahan tahay DigiD-gaaga.
2. Telefoonka: Wac **0800-1202**.

Guriga joog ilaa aad natiijada ka hesho GGD.

Laguuma oggola in lagu soo booqdo ilaa aad natiijada hesho.

GGD ayaa kuu sheegeysa markaad banaanka aadi karto.



Tallaalka


Tallaalka ka hortaga Corona wuxuu kaa badbaadinaayaa fayruska-Corona.

Waxaa tallaalka u qaadaneysaa cirbad ahaan oo garabka ah.

Tallaalka ka dib kuma xanuunsaneysid fayruska ama wax yar ayaa ku xanuunsanaysaa.

Waxaa Nederland ballan loo sameyn karaa qof walba laga bilaabo 12 jir.

Waxaa websaytka Pharos ku qoran warbixin dheeraad oo tallaalka ku saabsan.



Dhaqtarka qoyska

Waa muhiim markaad xanuuno Corona leedahay aadan **aadin** dhaqtarka qoyska. Waa inaad horta wacdaa .

Ma leedahay xanuuno kale oo aan ahayn Corona? Markaa dhaqtarka qoyska waad aadi kartaa. Waa muhiim inaad daryeel hesho marka aad u baahan tahay.

Waxaad websaytka www.Thuisarts.nl ka heleysaa warbixin dheeraad oo Corona ku saabsan.



Ma qabtaa su'aalo kale oo ku saabsan Corona fayruska:

La xariir **0800-1351**